

## Warqad macluumaad

Sida ku xusan qodobka 36-aad cutubka 1-aad xarafka b ee Heshiiska Wien ee Xiriirka Qunsuliyadaha, Jamhuuriyadda Federaalka ee Jarmalka, waxaa waajib ku ah inay wargeliyaan howlwadeenka qunsuliyada ee dalkaaga hooyo xoriyadda lagaa qaaday, codsigaaga kadib. Macluumaadka waxaa gudbinaya Maxkamadda, Xeer-ilaaliyaha ama goobta aad ku xiran tahay.

Intaas waxaa sii dheer, howlgalka diblomaasiyeed ee dalkaaga hooyo sidoo kale **waxaa** lagu wargelin karaa xaqiiqooyinka ku saabsan xoriyadda lagaa qaaday ee aad ku salaysan tahay, **taasu waa haddii bixiso oggolaanshahaaga**. Oggolaanshahaan waad ka noqon kartaa wakhti kasta.

Waxaa intaas dheer oo wax laga tilmaamayaa, in qandaraasyo isla galeen Jamhuuriyadda Federaalka ee Jarmalka iyo dowlado kala duwan, oo bixinaya waajibaad ah in la wargeliyo ergada diblomaasiyeed ee dibadda, xitaa adigoon ogayn ama aadan rabin. Qandaraasyada noocan oo kale ah waxay ka dhexeeyaan waddamadaan soo socda:

**Dominica, Fiji, Grenada, Greece, Guyana, Talyaaniga, Jamaika, Lesotho, Malawi, Malta, Mauritius, Monaco, Sierra Leone, Spain\*, St. Kitts iyo Nevis, St. Vincent iyo Grenadines, Tuisia, Boqortooyada Ingriiska iyo Waqooyiga Ireland (oo ay ku jiraan Jasiiradaha Channel, Jasiirada Man iyo dhulka dibadda ee Ingiriiska (Anguilla, Bermuda, Jasiirada Biritishka, Jasiiradaha Falkland, Gibraltar, Jasiirada Cayman, Montserrat, Jasiirada Picairn, St. Helena, Ascension iyo Tristan da Cunha, Turks- iyo Jasiirada Caicos se)), Cyprus.**

Haddii aad tahay muwaadin ka tirsan mid kamid ah waddamadaas, waxaa hubaal ah - xitaa haddii aadan rabin tan - in Maxkamadda, Xeer-ilaaliyaha ama goobta aad ku xiran tahay, ay ogeysiin doonaan xornimo ka qaadistaada xaafiiskaaga diblomaasiyeed ee dibadda.

Dabcan, waxaad xor u tahay inaad u sheegto matalaada wadankaaga hooyo shaqsi ahaan xoriyadda lagaa qaaday. Waxaad sidoo kale wakhti kasta u diri kartaa fariin kale.

\* Fiiro gaar ah u yeelo, in halkaan ogeysiin lagu fulin karo oo keliya, haddii aadan shaqsi ahaan awood u lahayn inaad codsato ogeysiinta booska qunsuliyada kuugu dow.